# Tilmaamaha Foomka Wakiilka La Oggolaaday ee Dacwoodaha Awood-darroobay

## QAYBTA 1-AAD: TILMAAMO GUUD

Buuxi oo si gacanta ah u saxiix foomkan **haddii aad tahay xubin qoys ee dacwoode awood-darroobay** sabab la xiriira xaalad caafimaad oo halis ah, adiguna waxaad codsanaysaa inaad matasho dacwoodaha awood-darroobay si aad ugu matasho magacooda.

Waxaad codsan kartaa inaad wakiil ka noqoto codsade awood-darroobay haddii aad tahay xubin qoys, sida lagu qeexay ORS 657B.010. Waxaad ka heli kartaa qeexidda xubin qoys qaybta 3-aad ee tilmaamaha.

Bixiyaha adeegga caafimaadka ee daweynaya dacwoodaha sababtuna tahay awood-darroobidooda waa inuu saxiixaa foomkan si uu u xaqiijiyo xaaladda caafimaad halista ah ee dacwoodaha.

Paid Leave Oregon ayaa kala niqaashi kartaa dheefaha barnaamijka Paid Leave ee hadda la heli karo iyo kuwa aan weli wakhtigooda la gaarin. Waxay na siisaa oggolaansho aan ku bixino macluumaadka ku jira diiwaanadeena, kaas oo haddii kale noqon lahaa mid qarsoodi ah. Tan waxaa ku jira, balse kaliya kuma xaddidna macluumaadka:

- Ku saabsan wax kasta oo faa'iido ah oo uu dacwoodaha helay ama uu heli doono
- Waxaa lagu bixiyay codsiga hore ee dacwoodaha
- Ku saabsan go'aan kasta oo la sugaya ama la soo saaray oo aan ka gaarnay eeda

Waxay sidoo kale siisaa wakiilka la oggolaaday  oggolaansho inuu bixiyo macluumaad ku saabsan Paid Leave, oo ay ku jiraan
macluumaad loo baahan yahay si loo:

- Buuxiyo arjiga/cosashada dheefaha
- Xareeyo codsi cusub ee ku aadan dheefaha dacwoodaha
- Codsado garmaqal si dib loogu eego go'aanka ay gaartay Paid Leave isla markaana la horkeeno Xafiiska Garmaqalka Maamulka adigoo ku hadlaaya magaca dacwoodaha

Paid Leave waxay hal wakiil idman u aqoonsanaysaa inuu matalo dacwoodihiiba. Ma aqbali doonno codsi wakiil la oggolaaday haddii ilaaliye sharci ah ama kormeeraha maxkamadda u magacaabatay uu xaq u leeyahay inuu ku hadlo magaca sheeganaha. Tani sidoo kale waa run dadka dacwoodayaasha ee siiyay qof kale awood-qoreen si uu ugu hadlo magacooda iyaga oo raacaya ujeeddooyinka Paid Leave Oregon.

**Fadlan bixi dhammaan macluumaadka loo baahanyay. Macluumadka oo aan dhammeystirnayni wuxuu sababi karaa inuu dib u dhigo dardargelinta codsigaaga. Saxiixyada foomkan waa inay noqdaan kuwo lagu saxiixay gacanta. Ma aqbali doonno saxiixyada elektarooniga ah.**

**Haddii aad diyaar u tahay inaad codsi la xiriir dheefta aad soo gudbiso adigoo matalaya dheef-sugaha, waxaad ku soo diri kartaa codsigaaga foomkan.**

**Fiiro gaar ah: Adigoo ah wakiilka idman, ayaa ah qof kaliya soo diri kara arji dheef oo ka dhan ah qofka aad ku matalayso codsiga.**

**Ma u baahan tahay caawimaad?**

Macluumaadkani waa mid aad u muhiim ah. Waaxda Shaqaalaynta ee Oregon (The Oregon Employment Department, OED) waa wakaalad leh fursad loo siman yahay. OED waxay ku siineysaa caawimo bilaash ah si aad u isticmaasho adeegyadeena. Tusaalooyinka qaarkood waa luqadda dhegoolaha iyo tarjumaannada luuqada lagu hadlo, agab ku qoran afaf kale, far waaweyn, maqal iyo qaabab kale. Si aad u hesho caawimo, fadlan wac 833-854-0166 (lambarka bilaashka ah). Dadka isticmaala TTY waxay wacaan 711. Waxaad sidoo kale iimaayl u diri kartaa access.paidleave@oregon.gov.

## QAYBTA 2-AAD: TILAAMAHA KU SAABSAN SIDA LOO BUUXIYO FOOMKA

**Xubin qoys:** Buuxi Qaybaha A, B iyo C ee foomkan. Sii Qaybta D bixiyaha daryeelka caafimaadka ee dacwoodaha si uu u buuxiyo.

- **Qaybta A:** Buuxi qaybtaan adigoo adeegsanaya macluumaadka dacwoodaha.
- **Qaybta B:** Ku buuxi qaybtan macluumaadkaaga.
- **Qaybta C**: Buuxi qaybtaan adigoo gelinaya taariikhda bilaabashada oggolaanshaha. Uga tag taariikhda dhammaadka oggolaanshaha meel banaan haddii aadan garanayn taariikhda dhammaadka awood-darroobida dacwoodaha.
- Oggolaanshuhu si toos ah ayuu u dhammaadaa marka:
  - Dacwooduhu uusan mar dambe awood-darroobin
  - Sannad dheefeedka hadda ee dacwooduhu uu dhammaado
- Haddii aadan ku soo dirin codsi ku saabsan dheefaha Paid Leave muddo 30 maalmood gudahood ee waaxdu ku ansixisay inaad tahay wakiilka la oggol yahay.
- Haddii dacwooduhu uu geeriyoodo, oggolaanshuhu wuxuu ku dhammaanayaa taariikhda geerida.

  Waa inaad sidoo kale buuxisaa, **gacantada ku saxiixdaa,** oo aad taariikhda ku qortaa qaybtan Ma aqbali doonno saxiixyada elektarooniga ah.
- **Qaybta D**: Sii bixiyaha daryeelka caafimaadka ee dacwooduhu macnaha ku jira qaybta 3 ee tilmaamaha. Ka dhig bixiyaha daryeelka caafimaadka ee dacwooduhu inuu buuxiyo oo gacanta ku saxiixo qaybtaan si loo xaqiijiyo in dacwooduhu yahay mid aan shaqeyn karin.
- Ku lifaaq dukumiintiyada xaqiijinaya xiriirka qoys ee aad la leedahay dacwooduhu iyo dukumiintiyada muujinaya aqoonsiga dacwooduhu iyo aqoonsigaaga. Waxaad ka heli kartaa Qaybta 4-aad liiska dukumiintiyada la aqbali karo ee aad u isticmaali karto ujeeddooyinkaan.
- Waajib ayay kugu tahay inaad foomkan iyo dukumiintiyada kale ee loo baahan yahay u dirto Paid Leave Oregon. Waxaad u diri kartaa midkood si elektaroonik ah adigoo adeegsanaya foomka 'Nala soo xiriir' ee ku jira frances.oregon.gov, ama waxaad ku soo diri kartaa boosto ahaan cinwaankan:

**Attn: Paid Leave Oregon**
**Oregon Employment Department**
**875 Union St NE**
**Salem, OR 97311**

**Bixiyaha daryeelka caafimaadka ee dacwooduhu:**

- Dib u eeg qeexitaannada bixiyaha daryeelka caafimaadka, xaalad caafimaad oo halis ah, iyo awood-darroobid ee ku jira Qaybta 3 ee tilmaamaha.
- Buuxi Qaybta D ee foomkan oo gacantaada ku saxiix, oo taariikheey qaybtan.
    - Adigoo buuxinaya oo saxiixaya qaybtan, waxaad xaqiijinaysaa in dacwooduhu:
        - Uu awood-darroobay iyada oo ay ugu wacan tahay xaalad caafimaad oo daran (OAR 471-070-1000),
        - Uusan codsan karin dheefaha Paid Leave Oregon, iyo
        - Uusan dooran karin wakiil ku matala beddelkooda.
    - Ma aqbali doonno saxiixyada elektarooniga ah.
- U soo celi foomka la dhammaystiray oo la saxiixay xubin qoyska ah oo codsanaysa inay matasho ka dacwoodaha awood-darroobay. Waxay foomkan u diri doonaan Paid Leave Oregon.

## QAYBTA 3-AAD: QEEXITAANADA

**Qeexitaanka xubinta qoyska**

ORS 657B.010 wuxuu xubinta qoyska ku qeexaa sidan:

- Lamaanaha qofka la daboolay;
- Ilmaha qofka daboolan ama lamaanaha sharciga ah ee ilmaha ama lammaanaha guriga;
- Waalidka qofka la daboolay ama lamaanaha sharciga ah ee waalidka ama lammaanaha guriga;
- Walaalka ama walaalka eedada ee qofka la daboolay ama lamaanaha sharciga ah ee walaalka ama walaal-eedada, ama lammaanaha guriga;
- Awoowe ama ayeeyo qofka la daboolay ama lamaanaha sharciga ah ee awoowaha/ayeeyada, ama lammaanaha guriga;
- Ilmaha awoowe/ayeeyo loo yahay ee qofka la daboolay ama lamaanaha sharciga ah ee Ilmaha awoowe/ayeeyo loo yahay, ama lammaanaha guriga;
- Lammaanaha guriga ee qofka la daboolay; ama
- Qof kasta oo ku xiran xidhiidh dhiig ama xidhiidh qaraabo ah, kaasoo xiriir dhow uu la leeyahay qofka la daboolay uu u dhigmo xidhiidh qoys.

**Qeexitaanka bixiyaha daryeelka caafimaadka**

OAR 471-070-1000 waxa uu u qeexaa bixiyaha daryeelka caafimaadka sida midkood:

(a) Qof si weyn mas'uul uga ah bixinta daryeelka caafimaadka ee dacwooduhu ama xubin ka mid ah qoyskiisa kahor ama inta lagu jiro muddada Fasaxa La Bixiyo, oo shati ama shahaado u haysta in uu ku shaqeeyo si waafaqsan shuruucda gobolka ama dalka uu ku shaqeeyo, oo fulinaya howshiisa gudaha xadka shatiga xirfadeed ama shahaadadiisa, isla markaana ah:

- Dhakhtarka lafaha jimciya (kaliya marka la bixinayo daaweyn ku lug leh manfacyada isku toosinta laf dhabarta si loo saxo qallooca/kala baxa Raajada-laga arkay)
- Dhakhtarka ilkaha
- Umuliso si toos ahtu gasha
- Dabeecad-daaweeye
- Kalkaaliye dhakhtar
- Kalkaaliye-dhakhtar ku takhasusay kalkaalinta-umulinta
- Dhakhtarka arraga
- Dhakhtar indhaha
- Kaaliyaha dhakhtarka indhha
- Dhakhtarka cilmi nafsiga
- Kalkaaliye diiwaangashan
- Shaqaale bulsho oo xeeraysan(ama)

(b) Qof si weyn mas'uul uga ah daaweynta dacwooduhu ama xubin ka mid ah qoyskiisa oo keliya iyadoo la adeegsanayo hababka ruuxiga ah kahor ama inta lagu jiro muddada Fasaxa La Bixiyo, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku koobnayn, dhakhtar ka tirsan Christian Science.

**Qeexidda xaalad caafimaad oo halis ah**

OAR 471-070-1000 waxa uu u qeexaa “xaalad caafimaad oo halis ah” sida:

Cudur, dhaawac, naafo, ama xaalad jireed ama maskaxeed oo ku timaadda dacwooduhu ama xubin ka mid ah qoyskiisa taasoo:

- U baahan daryeel gudaha goob caafimaad sida isbitaal, hoy daryeel, ama xarun deggan sida, laakiin aan ku koobnayn, guriga kalkaalinta ama xarunta daaweynta maandooriyaha ee gudaha
- Marka loo eego qiimeynta caafimaad ee bixiyaha daryeelka caafimaadka ee daaweynaya, waxay khatar toos ah ku tahay dhimashada, ama waxay tahay xaalad dhimasho leh oo saadaasheedu muujinayso suurtogalnimo macquul ah oo dhimasho ah mustaqbalka dhow.
- U baahan daryeel joogto ah ama sii socda, oo ay ku jirto daryeel guriga lagu bixiyo oo ay fulinayso xirfadle daryeel caafimaad.
- Waxay ku lug leedahay muddo uu qofku awood la’aan ku jiro. “Awood darroobida” waxay tahay awood la’aanta lagu fuliyo ugu yaraan hal shaqo oo muhiim ah, ama lagu tago iskuul ama lagu qabto hawl maalmeed caadi ah muddo ka badan saddex maalmood oo isku xigta oo jadwalka ah. Muddada awood la’aanta waxay ku jirtaa sidoo kale wixii daaweyn ama muddada soo-kabashda ee loo baahan yahay ee la xiriirta isla xaaladdaas. Awood la’aanta waa inay ku lug leedahay mid ka mid ah waxyaabaha soo socda:
    - Laba ama in ka badan oo daaweyn ah oo ay bixiso bixiyaha daryeelka caafimaadka
    - Hal daaweyn iyo sidoo kale qorshe daryeel joogto ah
- Waxay keentaa muddo awood la’aan ah ama daaweyn loogu baahan yahay xaalad caafimaad oo halis ah oo daba-dheer taasoo u baahan booqashooyin joogto ah oo daaweyn bixiyaha daryeelka caafimaadka ah, waxayna sii socotaa muddo dheer, waxaana laga yaabaa inay keento waqtiyo go’an oo awood la’aan ah halkii ay ka ahaan lahayd awood la’aan joogto ah, sida neefta, macaanka, ama suuxdinta.
- Waxay ku lug leedahay awood la’aan joogto ah ama muddada-dheer oo ka dhalatay xaalad daaweynteedu laga yaabo inaysan waxtar yeelan, sida Cudurka Alzheimer, faaliga daran, ama marxaladaha dhimasho ee cudur. Shaqaalaha ama xubin ka mid ah qoyskiisu waa inuu hoos yimaadaa daryeelka joogtada ah ee bixiyaha daryeelka caafimaadka, laakiin looma baahna inuu helo daaweyn firfircoon.
- Waxay ku lug leedahay daaweynno badan oo lagu sameeyo qaliin soo-kabasho ama xaalad sida kimiterabiga kansarka, daaweynta jireed ee arthritis, ama dhaqista kelyaha, taasoo haddii aan la daaweyn u badan tahay inay keento awood la’aan ka badan saddex maalmood oo maalmo jadwaleed ah.
- Waxay ku lug leedahay wax kasta oo muddo naafonimo ah oo ka dhalatay uur, dhalid, ilmo dhicin ama ilma-dhallashada ku dhinta),waqti maqnaansho ah oo loogu talagalay daryeel ka uurka
- Waxay ku lug leedahay muddo ka maqnaansho shaqo ah oo loogu talagalay deeqida qayb jidheed, xubno, ama unug, oo ay ku jiraan adeegyada ka hor qaliinka ama baaritaanka, qaliinka, daaweynta ka dib qaliinka, iyo soo-kabashada

**Qeexidda Awood-darroobida**

Sida ku xusan ORS 125.005 (5), “Awood-darroobida” waxay ka dhigan tahay xaalad qofka awooddiisa uu ku heli karo oo uu ku qiimeyn karo macluumaadka si wax ku ool ah ama uu ku gudbin karo go’aannadiisa ay hoos u dhacday ilaa heer uu qofku hadda ka maqan yahay awoodda uu ku buuxin lahaa shuruudaha muhiimka ah ee caafimaadkiisa jireed ama badbaadadiisa. “Buuxinta shuruudaha muhiimka ah ee caafimaadka jireed iyo badbaadada” waxay ka dhigan tahay tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee lagu bixiyo daryeelka caafimaadka, cuntada, hoyga, dharka, nadaafadda shakhsiga iyo daryeel kale oo aan la siin, dhaawac jireed oo halis ah ama cudur halis ah uu u badan yahay inuu dhaco.

## QAYBTA 4-AAD: DUKUMIINTIYADA LA AQBALI KARO

**Dukumiintiyada la aqbali karo ee lagu xaqiijinayo xiriirka qoyska:**

- Bayaanka Shahaadaysan ee Lamaanaha Guriga
- Waraaqda/Shahaadada Dhalashada Sharciga ah
- Waraaqda/Shahaadada Guurka Sharciga ah
- Dukumiintiyo kale, iyadoo ay go'aamiso Paid Leave Oregon, oo ay soo saartay dhinac saddexaad oo madax-bannaan kuwaasoo caddeynaya guurka, lamaanaha guriga, waalidnimo ama xiriir kale oo qoyska ah oo u dhexeeya dacwooduhu iyo qofka codsanaya inuu ku matalo dacwoodaha.

**Dukumiintiyada la aqbali karo ee lagu xaqiijinayo aqoonsiga dacwooduhu awood la'aanta ku jira iyo qofka codsanaya inuu ku matalo dacwoodaha waxaa ka mid ah:**

**Fiiro gaar ah:** Waa inaad soo dirtaa labo dukumiinti aqoonsi oo aasaasi ah mise mid aasaasi ah iyo labo dukumiinti oo kaabaysa codsiga oo adiga iyo cid aad matalayso iska leh. Waa in ay noqdaan sawirro midab buuxa leh iyo PDF.

**Dukumiintiyada aasaasiga ah**

- Leesinka/Shatiga darawalnimada (ama ruqsada ardaynimo) ee ay bixisay gobol ama dhul hoos yimaada Maraykanka (Waxaan aqbali doonaa shati/leesin dhacay haddii uu dhacay 12-kii bilood ee la soo dhaafay isla markaana uu is haysto.)
- Dukumiintiyada kale ee aqoonsi ee ay bixisay dowladda (Waa inaay ahadaan kuwo dal-ku joog rasmi ah oo leh sawirka qofka. Aqoonsiyada Militiriga , dukumiintiyada mise waraaqaha sida ku meel gaarka ah dal loogu joogo lama aqbalaayo.)
- Aqoonsi sawir leh oo ay soo saartay dowlad goboleed (Waxaan aqbali doonaa aqoonsi dhacay haddii uu dhacay 12-kii bilood ee la soo dhaafay isla markaana uu is haysto.)
- Baasaborka Maraykanka mise Kaarka Baasaboorka Maraykanka
- Maraykanka Kaarka Dal ku joogga ee Rasmiga ah (I-551
- Kaarka Aqoonsiga Shaqaalaha ee ay bixisay USCIS (I-766) (Ma ahan kaararka aqoonsiga shaqa bixiyaha soo saaro)
- Baasaboorka ajaaniibta
- Kaarka Aqoonsiga Caafimaadka Qof horaan uga tirsanaa ciidanka qalabka sida
- Kaararka Safarayda ay Xaqiijisay Waaxda DHS (DHS Trusted Traveler Cards (Global Entry, NEXUS, SENTRI)
- Leesinka/Shatiga daraawalnimada ee ay bixisay Kanada
- Waraaqda Muwaadnimada (Foomka N-550 mise N-570)
- Kaarka Aqoonsiga ee Dalka (kaliya haddii aad ku nooshahay meel ka baxsan Maraykanka.)
- Aqoonsisawir leh oo ay soo saartay Qolo ay dawladda federaalka aqoonsantahay
- Fiisaha dal ku jooga ee la siiyo ajaaniibta ee ay bixiso Maraykanka Dukumiintiyada ay bixiso Waaxda Arrimaha Dibadda (oo aysan dhacsanayn in ka badan shan sano)
- Fiisaha dal ku jooga ee la siiyo ajaaniibta (I551) ee ay bixiso Maraykanka Dukumiintiyada ay bixiso Waaxda Arrimaha Dibadda (oo aysann dhacsanayn in ka badan shan sano)

**Dukumiintiyada aan Aasaasiga ahayn** (Dukumintiyada hoos ku xusan/soo socda oo ah dhijitaal, leh midibkooda asalka ah isla markana ah qaab PDFs ayaa la aqbali karaa inay noqdaan dukumentiyo aan aasaasi ahayn)

- Kaarka Sooshal Sekuuritiga
- Maraykanka Shahaadada Dhalashada ee Dibadda (FS-545)
- Maraykanka Shahaadada Warbixinta Dhalashada (FS-1350)
- Kaarka arrimaha waqooyiga ee Canadian Indian
- Kaarka aqoonsiga ardeyga ee Kolejka mise jaamacadda
- Shahaadada kolejka mise jaamacadda

- Maraykanka Waraaqda Dhalasha Canug ku soo dhashay Dibadda (FS-240)
- Kaarka caymiska caafimaadka ee dalka Maraykanka
- Waraaqda dhalashada maraykanka oo leh shaabbad rasmi ah (magaca koowaad iyo magaca dambe)
- W-2 form
- 1098 form
- Kaarka caymiska otomaatiga ah
- Kaarka qaabilaadda xuduudaha
- Maraykanka Kaarka Ilaalada Gaadiidka kula goosha Badda
- Maraykanka Kaarka Aqoonsiga Muwaadinnimada form (I-197)
- Shahaada/Waraaqda ka fadhisashada Militiriga Dawlada (DOD)
- Dukumiintiga caymiska guriga mise gaariga
- Warqad cadeynaysa deganaanshaha gobolka
- Caawinta Nafaqada Dheeraadka
- Shahaadada Qaataha Barnaamijka
- Dukumiintiga Muujinaysa Qof Maraykan Dhalad ah
- Non SSA-1099 form
- SSA-1099 form
- Shahaadada mise kaarka diiwaangelinta Codbixiye ku dhaqan Maraykanka mise gobol aymaamusho
- Shahaadada helaha Barnaamijka Haweenka, Dhallaanka, iyo Caruurta (WIC) ee Puerto Rico

**Dukumiintiyada aan asaasiga ahayn (** Waa in la bixiyey muddo ka yar 90 maalmood)

- **Biilka adeegyada guriga** (oo muujinaya lambarka koontadaada, magacaaga oo seddaxan, iyo meesha aad hadda ku nooshahay)
- **Biilka adeegyada caafimaadka** (oo muujinaya lambarka koontadaada, magacaaga oo seddaxan meesha aad hadda ku nooshahay)
- **Bayaanka bangiga, amaahda, mise hay'adda maaliyadda** (oo muujinaya lambarka koontadaada, magacaaga oo seddaxan, iyo ciwaanka aad hadda ku nooshahay; oo ay bixisay bangiga)
- **Risiidka munshahaarka** (oo muujinaya magaacaga oo dhammaystiran, magaca shaqa-bixiyahaaga mise shirkaddaada, ciwaanka aad hadda ku nooshahay; waa inuu ahadaa risiid lacag bixineed loo lama jeedo jeegga bangiga)

Paid Leave Oregon

# Foomka Wakiil Idman
# Foomka Dacwooduhu Awood-darroobay

| QAYBTA A - MACLUUMAADKA QAYBTA DAWOODAHA | |
|---|---|
| Magaca hore: | Magaca dambe: |
| Lambarka Sooshal Sekuuritiga (SSN): ________________________________ ama<br><br>Lambarka Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha Shakhsiga ah (ITIN): ________________________ | |
| Taariikhda dhalashada (BB/MM/SSSS): / / | Lambarka taleefanka: |
| Ciwaanka guriga: | Ciwaanka boostada (Haddii ay ka duwan tahay tan guriga): |
| Ciwaanka iimaylka (ikhtiyaari): | |

| QAYBTA B – MACLUUMAADKA WAKIILKA LA IGMADAY | |
|---|---|
| Magaca Hore: | Magaca dambe: |
| Taariikhda dhalashada (BB/MM/SSSS): / / | Xiriirka kaala dhexeeyo dacwoodaha: |
| Ciwaanka guriga: | Ciwaanka boostada (Haddii ay ka duwan tahay tan guriga): |
| Lambarka taleefanka: | Ciwaanka iimaylka (ikhtiyaari): |

**QAYBTA C: WAKIILKA LOO IDMAY OGGOLAANSHHAHA IYO SAXIIXA DCWOODUHU AWOOD-DARROOBAY**

Oggolaanshahan wuxuu ansax yahay laga bilaabo (BB/MM/YYYY): / / iyadoo loo marayo: / /
(U dhaaf taariikhda dhammaadka bannaan haddii aan la garanayn)

**Sida heerkaaga la ansixiyay ee ah wakiil loo oggolaaday dacwooduhu awood-darroobay ku jira uu ku dhamaan karo:**

- **Oggolaanshahaaga ayaa si toos ah u dhamaan doonta (midka ka soo hormara):**
  - **Marka dacwooduhu aanu mar dambe awood la'aan ku jirin, ama**
  - **Marka sannad dheefeedka hadda ee dacwooduhu uu dhamaado**
- **Haddii aadan codsan dheefaha Fasaxa La Bixiyo ee dacwooduhu muddo 30 maalmood gudahood tan iyo oggolaanshahaaga wakiil loo ansixiyay, oggolaanshahaaga wuu dhamaan doonaa.**
- **Haddii dacwooduhu uu dhinto, oggolaanshuhu wuxuu dhamaanayaa taariikhda dhimashada.**

**Shahaadada wakiilka loo oggolaaday ee guriga awood-darroobid ku jirta:** Waxaan ku dhaqmaya danaha ugu wanaagsan ee dacwooduhu waxaana ilaalinayaa qarsoodiga macluumaad kasta oo aan ka helo Paid Leave Oregon aniga oo ku matalaya sheeganaha. Waxaan fahamsanahay in awooddayda aan ku matalo dacwooduhu ay dhamaan doonto marka sheeganaha aanu mar dambe awood la'aan ku jirin. Waxaan oggolahay inaan ku wargeliyo Paid Leave Oregon muddo saddex maalmood oo jadwal ah gudahood markii aan ogaado in dacwooduhu uu si madax-bannaan uga shaqayn karo danihiisa.

| | |
|---|---|
| Saxiixa wakiilka loo oggolaaday ee dacwooduhu awood la'aanta ku jira: | Taariikhda: / / |

**Waa inaad gacantaada ku saxiixdaa foomkan. Ma aqbali doonno saxiixyada elektarooniga ah.**

| Magaca dacwoodaha: | SSN-ka ama ITIN-ka Dacwoodaha: |
|---|---|

**QAYBTA D – MACLUUMAADKA IYO SHAHAADEYNTA BIXIYAHA DARYEELKA CAAFIMAADKA**

| | |
|---|---|
| Magaca dacwooduhu: | Taariikhda dhalashada: / / |
| Magaca Bixiyaha Daryeelka Caafimaadka: | Cinwaanka: |
| Lambarka shatiga shahaadada (ikhtiyaari): | Gobolka ama dalka: |
| Aaga shatiga ama aaga ku dhaqanka | Taleefanka: |
| Ciwaanka iimaylka (ikhtiyaari): | |
| Magaca Ganacsiga: | |
| Cinwaanka: | |

☐ Waxaan akhriyay qeexitaannada bixiyaha daryeelka caafimaadka, xaalad caafimaad oo halis ah (OAR 471-070-1000)iyo awood la’aanta (ORS 125.005).

**Shahaadeynta Bixiyaha Daryeelka Caafimaadka:** Waxaan ku cadeynayaa ciqaabta beenta oo aan:

- Dacwooduhu ku qoran foomkan waa mid awood-darroobay (ORS 125.005) iyada oo ay ugu wacan tahay xaalad caafimaad oo halis ah sida ku qeexan OAR 471-070-1000.
- Dacwooduhu ma awoodi karo inuu dhammaystiro talaabooyinka loo baahan yahay si uu u codsado faa’iidooyinka Paid Leave Oregon iyo ma awoodi karo inuu doorto wakiil ku matala isaga/iyada:
- Anigu waxaan ahay bixiye daryeel caafimaad oo oggolaaday in uu shahaadeeyo xaaladda sheeganaha sida ku qeexan OAR 471-070-1000 waxaana daaweynayaa sheeganaha sababtoo ah awood la’aantiisa.
- Macluumaadka ku jira foomkan waa mid run oo sax ah.

| | |
|---|---|
| Saxiixa Bixiyaha Daryeelka Caafimaadka: | Taariikhda: / / |

**Waa inaad gacantaada ku saxiixdaa foomkan. Ma aqbali doonno saxiixyada elektarooniga ah.**